

FAAFIN
الرسمية



RASMI AH
الجريدة

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 4aad

Muqdisho, 30 Setembre 1976

L. 4

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.

FAAFIN BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somalaya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOObNIIN BOGGA KOOWAAD SHARCI

- SHARCI L. 4 ee 4 Agoosto 1976, *Abaabul Sharci ku saabsan Cashuur ka dhaafid la xiriirta Alaabta loo keeno ama dhoofinta ama ka iibsado Furdadda Guddaheeda Xisbiga Hantiwadaagga K. Soomaaliyeed.* Bogga 39
- SHARCI L. 5 ee 16 Agoosto 1976, *Dhismo Guddi Cadaaladeed.* » 40
- SHARCI L. 6 ee 22 Agoosto. 1976 *Awooda Sharci Dejinta.* » 42

BOGGA LABAAD

- XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16 Agoos. 1976 *Magacaabid Guddi Cadaaladeed L. (16).* » 43
- XEER MADAXWEYNAHA J.D.S ee 23 Agoos. 1976, *Ogolaansho soo saarid Lacag L. (17)* » 44
- BCRES THE PRES. OF THE S.D.S. 23 Agoos. 1976 *The Central Bank of Somalia is authorized to issue: L. (17)* » 45
- XEER MADAXWEYNAHA J.D.S ee 23 Agoos. 1976 *Caddayn Summadaha Farsamada Lacagta Caadiga ee Shilin Soomaaliga L. (18)* » 46

- DERCEE THE PRES. OF THE S.D.R. 23.8.76, *Determination of the Technical and Artistical features of the new Somali Shilling coins L. (18)* » 47
- XEER MODAXWEYNAHA J.D.S. 29 Luuliyo 1976, *Magaabid Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaada Shaqaalaha L. (19)* » 50
- XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 29 Luuliyo 1976, *Dallacaad Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed L. (20)* » 51

BOGGA SADDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

- MAXKAMADDA DEG. BERBERA, 9.8.1976, *Dhumista Buuga kaydka L. 1825 ee ku qoran yahay Aadan Guuueed Cabdi L. (2)* » 52
- MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.8.76, *Lumidda Buuga kaydka Lamb. 646 kuna qoran Cumar Maxamed Nuur (L.3)* » 53
- MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR 5.8.76 *Lumid buuga kaydka L. 5556 ku qoran yahay Maxamuud Sheekh Axmed L. (4)* » 54
- MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA 4.9.76, *Lumid Jeeg War. Lamb. 094518 ku qoran Sh S. 4.100/= u leyahay Maxamuud Cisman Gudaal L. (5)* » 55
- MAXKAMADDA GOBOLKA Sh/Hoose 18.9.76 *Lumid Buug kaydka L. 2383 ku qoranayd Sh S. 7.000/= u leyahay Cali Faarax Cigaal L. (6)* » 56
- MAXKAMADDA DEGMADA BERBERA, 3.8.76, *Lumid Jeeg War. Lamb. 1391/7 kuna qoran tahay Sh. So. 1.001/= u leyahay Ibraahim Cabdi Camale L.(7)* » 57
- WARSHADDA MARMARKA MUQDISHO 15.9.1976 *ISMA S.p.A. — L. (8).* » 58
- MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR, — *Lumidda Jeegga lam. 095009 oy ku qoran tahay Sh. So. 2.400 uuna ku qoran yahay Cawil Xasan Dirrir* » 59

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 4 ee 4 Agoosto 1976, Abaabul Sharci ku saabsan Cashuur ka dhaa-

MADAXWEYNAHA

J.D.S

ISAGOO ARKAY: Xaashida Koowaad iyo tan Labaad ee Kacaanka iyo Sharcigii kowaad ee soo baxay 21kii Oktoobar 1960 iyo Xaashida Saddexaad ee soo baxday koowda Luul iyo 1976.

ISAGOO TIXGELINAYA:- Go'aankii Golaha Wasiirada iyi kan Xisbiga.

WUXUU DHAQAN GELINAAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA:-

Qodobka 1aad

Alaabta uu Xisbiga Hantiwac'aagga Kacaanka Socmaaliyeed soo dejiyo ama dhoofinaayo ama iibsado Furdadda, gudaheeda intaan la cashuurin, waxaa laga dhaafay Cashuurta keenidda iyo tan dhoofinta iyo wixii la xiriira oo dhan.

Cashuur ka dhaafidda waxaa soo ogolaanayaa Wasaaradda Maaliyadda Waaxda Furdada inka kadib markii ay soo weydiistaan Madaxda Xisbiga ee hawshaa oo xil saaray.

Qodobka 2aad

Sharcigaan wuxuu dhaqan galayaa isla markiiba waxaanna lagu soo saari doonaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliyeed.

Muqdisho 4.8.1976

WASIIRKA MAALIYADDA

(Cabduraxmaan Nuur Xirsi)

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA D.S.

(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L.5 ee 16 Agoosto 1976, Dhismo Guddi Caddaaladeed.

MADAXWEYNAHA

J.D.S

MARKUU ARKAY: Warqadii Koowaad iyo tii Labaad iyo tii seddexaad ee Kacaankii 21kii 1969.

MARKUU ARKAY: Sharciyada lam.17, 18 iyo 19 ee 1da Luuliyo 1976.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 1 ee 1da Luuliyo 1976.

ISAGOO TIXGELIYEEY: Go'aanka kasoo baxay Siyaasadda iyo Golaha Wasaarada taariikhdu markay ahayd

WUXUU SOO SAARAYAA

Shareiga soo socdo:

Qod. 1

Iyadoo ay ujeeddadu tahay in caddaaladda ijtimaaciga ah saldhigeeduna yahay mabda'a Hantiwadaagga Cilmiga ku dhisan la hirgeliyo laguna dhaqmo, waxaa halkan lagu dhaqmo, waxaa halkan lagu dhisyaa Guddi lagu magacaabo «GUDDI CADDAAALADEED».

Qod. 2

1. Guddigu wuxuu awood u leeyahay baaritaanka iyo go'aan ka gaarista dacwooyinka kaasoo dhammaada Maxkamadaha taasoo ah inuu ayidi karo, beddeli karo, beebi'in karo xukunnada kama dambaysta ah;
2. Waxaa awooddo Guddiga ka mid ah baarista iyo go'aan ka gaarista dacwooyinka kaasoo dhammaada Nabadgelyada iyo Degmooyinka, Guddiga Lacagta degdegga ah iyo wixii la siman
3. Awoodda Guddiga waxaa saldhig u ah:
I.Sharciga lam. yahay 30 soona baxay 5.4.1972, iyo beddelaaddii ka dambeysey.
II. Sharciga lam. yahay 1 ee soo baxay 10kii Jannaayo 1970.

Qodobka 3.

1. Guddiga Caddaaladda wuxuu ka koobnaadoonaa shan qof oo kala ah sidan soo socota:
I. Hal qof oo ka tirsan Guddiga Siyaasadda ee Xisbiga H.K.S. ee ka noqon doona Guddoomiye;

11. Afar Garsoore oo khibrad iyo waayo aragnimo leh.
2. Qof ka mid ah Garsooryaasha qodobkan ku tilmaaman wuxuu noqon doonaa Guddoomiye ku-Xigeen, seddexda kale xubin.

Qodobka 4.

Guddoomiyaha, Guddoomiye-ku-xigeenka iyo xubnaha kale ee Guddiga Caddaaladda waxaa lagu magacaabi doonaa xeer u saxiixo Madaxweyne J.D.S.

Qodobka 5.

Xeer hoose oo faahfaahin doona sharcigan ayaa la soo saari doonaa, kaasoo uu saxiixo Madaxweynaha isogoo tixgelinaaya go'aanka Guddiga Siyaasadda kaddib markii ay oggolaadaan talada Guddiga Caddaaladda.

Qodobka 6.

Sharci kasto oo ka horjeeda sharcigan ama la socos karin waa la baabi'yey.

Qodobka 7.

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 15 maalmood kaddib markii lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda:-

Muqdisho 16.8.1976

S. GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

(MADAXWEYNAHA J.D.S.)

SHARCI L. 6 ee 16 Agoosto 1976, Dhismo Guddi Caddaaladeed.

MADAXWEYNAHA

J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1, 2 iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyaça tirsigoodu yahay 17,18 iyo 19 oo soo baxeen 1 Luuliyo 1976 kuna saabsanaayeen la wareegidda Maamulka iyo Xukunka Dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY Qod, 10 ee Xaashida Saddexaad ee Kacaanka oo ku saabsanaa Guddiga gaarka ah ee Sharci dejinta;

MARKUU DHEGEYSTAY Talada Golaha Siyaasada ee Xisbiga H.K.S.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:-

Qodobka 1aad

Ilaa iyo inta la magacaabi doono Guddiga gaarka ah ee Sharci Dejinta oo lagu tilmaamay Qodobka 10aad ee Xaashida saddexaad ee Kacaanka, waxaa Awoodda Sharci Dejinta loo xilsaaray Golaha Siyaasada ee Xisbiga.

Qod; 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa durba, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.-
Muqdisho 16.8.1976

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre

BOGGA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 16 Agoos. 1976 Magacaabid Guddi Cadaaladeed L. (16)

MADAXWEYNAHA

J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashidii Koowaad iyo tii Labaad iyo tii seddexaad ee 21.10.69.

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 38 ee 5 Abriil 1972 iyo beddelaadii ka dambaysay;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lam. 17, 18, iyo 19 ee Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 1 ee Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY: Sharciga lam. 5 ee 16.8.1976 oo lagu dhisey Guddiga Caddaaladda.

ISAGOO TIXGELINAYA: Baahida loo qabo in la magacaabo Guddi Caddaaladeed si ay caddaaladda laga simo cadweynaha Soomaaliyeed.

WUXUU XEERAYAA

Qod. 1.

In Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran loo magacaabay iney ka mid noqdaan Guddiga Caddaaladda, iyagoo mid walba uu qabanaayo jagoyinka hoos ku sheegan:

- | | |
|--|--------------------------|
| 1. Jaalle S. Gaas Xusees Kulmiye Afrax | Guddoomiye |
| 2. Jaalle Dr. Cali Maxamed Ibraarim | Ku-xigeenka Guddoomiyaha |
| 3. Jaalle Dr. Maxamed Cabdullahi Axmed | Xubin |
| 4. Jaalle Dr. Aadan Cabdulqaadir Maxamed | Xubiin |
| 5. Jaalle Dr. Maxamed Xaaji Yuusuf | Xubin |

Qod. 2.

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J.D.S. waxaana lgu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 16.8.1976

S. GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)
MADAXWEYNAHA J.D.S.

J. D. S.

XEER MADAXWEYNAHA J.S.D. ee 23 Agoos, 1976, Oggolaansho soo saarid
Lacag L. (17)

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Xaashida Koowaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar, 1969, iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar, 1969.

MARKUU ARKAY: Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 6dii Maarso 1961, loona beddeley Sharciga Lr. 13 oo soo baxay 23kii Maajo 1961, kuna saabsan nidaamka lacagta Soomaaliya.

ASAGOO TIXGELINAAYA: Baahida loo qabo in la caddeeyo tarida lacagta cadadiga cusub ee Shilin Soomaaliga ah oo la doonayo in la soo saaro.

ASAGOO TIXGELINAAYO: Talada uu soo jeediyey Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

ASAGOO TIXGELINAAYA: Go'aanka Golaha Wasiirrada:

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

- Waxaa loo oggolaaday Bankiga Dhexe ee Soomaaliya inuu soo saaro:
- | | | | | | |
|----|---|------------|-----------------------|---------------|------------|
| B) | — | 10.020.000 | xabbo cadaqi min 1 | Sh. So. oo ah | 10.020.000 |
| T) | — | 5.040.000 | xabbo cadaqi min 0.50 | Sh. So. oo ah | 2.520.000 |
| J) | — | 20.500.000 | xabbo cadaqi min 0.10 | Sh. So. oo ah | 2.050.000 |
| X) | — | 11.000.000 | xabbo cadaqi min 0.05 | Sh. So. oo ah | 550.000 |

Qodobka 2aad

LACAGTA cadadiga ee min 1.00, 0.50 0.10 iyo 0.05 Shilin Soomaali ah, qodobka horena lagu tilmaamay, waxaa si tifaftiran loogu caddeeyey summadaheeda, farsamadeeda iyo farshaxankeeda Xeer kale oo isla taariikhda maanta soo baxay.

Qodobka 3aad

XEERKANI wuxuu chaqangelayaa maalinta lagu soo qoro faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

Muqdisho 25.8.1976

Wasiirka Maaliyada

Dr. Cabdiraxmaan Nuur Xirse

Jaalle Maxamed Siyaad Barré
Madaxweynaha

J. D. S.

DECRES THE PRES. OF THE S.D.S. 23 Agoos. 1976 The Central Bank of Somalia is authorized to issue: L. (17)

THE PRESIDENTA OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN: The First Charter of the October, 21, 1969 Revolution and the Law No. 1 of 21st October 1969.

HAVING SEEN: Art. 5 of Decree Law No. 2 of 6th March 1961 converted into Law No. 13 of 23rd May 1961, on the Monetary Ordinance of Somalia.

CONSIDERING: The necessity of determining the quantites in Somali Shilling Coins.

ON THE PROPOSAL: of the Governor of the Central Bank of Somalia.

HAVING HEARD: the Council of Ministers.

D E C R E E S

Art. 1.

The Central Bank of Somalia is authorized to issue:

- | | | | |
|--------------------------------|--------|------|---------------|
| a) — No. 10.020.000 coins of 1 | So.Sh. | » | 10.020.000 |
| b) — No. 5.040.000 | » | 0.50 | » » 2.520.000 |
| c) — No. 20.500.000 | » | 0.10 | » » 2.050.000 |
| d) — No. 11.000.000 | » | 0.05 | » » 550.000 |

Art. 2

The 1.00, 0.50, 0.10 and 0.05 Somali Shillings Coins referred to in the Previous article shall have the technical and artistical features established by a separate Decree under today's date.

Art. 3

This Decree comes into force on the date of its publication on the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdisho 23.8.1976,

The Minister of Fisanee

Mohamed Siyad Barre
The President

Cabduraxmaan Nuur Xirsi

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

XEER MODAXWEYNAHA J.D.S. ee 23 Agoos, 1976 Caddayn Summadaha Farsamada Lacagta Caadiga ee Shilin Soomaaliga L. (18)

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

CADDAYN SUMMADAHA IYO FARSAMADA LACAGTA CADADIGA EE SHILIN SOOMAALIGA.

MARUKUU ARKAY: Xaashida Koowaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969 iyo Sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar, 1969.

MARKUU ARKAY: Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 6dii Maarso 1961 loona beddeley Sharciga Lr. 13 oo soo baxay 23kii Maajo 19611, kuna saabsan nidaamka lacagta Soomaaliya.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 17 ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya oo lagu caddeeyey tirada lacagta cusub ee cadadiga Shilin Soomaaliga oo la soo saari doono.

ASAGOO TIXGELINAAYA: Baahida loo qabo in la tilmaamo summadaha iyo farsamada lagu sameynayo lacagta cadadiga ee cusub oo ah Sh. So. 1.00, 0.50, 0.10 iyo 0.05.

ASAGOO TIXGELINAAYA: Talada uu soo jeediyey Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

ASAGOO TIXGELINAAYA: Go'aanka Golaha Wasiirada. Wuxuu soo saarayaa xeerka soo socda.

Qodobka 1aad

Lacagta cadadiga cusub oo ah 1.00, 0.50, 0.10 iyo 0.5 Shilin Soomaali ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya loo oggolaaday inuu soo saaro asagoo tixraacaya Xeerka Lr 17 taariikhdiisuna tahay 23.8.1976 ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, lacagta cadadiga waxay leedahay summadahaan iyo tilmaamahaan ku saabsan xagga farsamada oo ah sida hoos ku qoran:

A. TILMAAMAHA FARSAMADA

Qiimaha	Macdanta	Araga	Ballaca	Miisaan	Geesaha
Sh. So. 1.00	Copro: 75% Nickel 25%	Wareeg	25.5	6.2	Girgirro
Sh. So. 0.50	Copro: 75% Nickel 25%	Wareeg	21.1	3.8	Girgirro
Sh. So. 0.10	Alliuminum	12 Gees	22.5	1.4	Gees Siman.
Sh. So. 0.05	Alliuminum	12 Gees	19.0	0.9	12Gees Siman

B. TILMAAMAHA SUMMADAHA.

Wejiga: Lacagto idil waxaa ku yaal, iyadoo ay ku wada si-man yihiin astaanta Dawladda Soomaaliyeed iyo erayada ah «JAMHUURİYADDA DIMUQRAADIGA EE SOOMAALIYA» oo ka qoran af Socmaali iyo Carabi kuwaasoo ay kala qaybiyaan laba dhibcood.

DHABARKA: Lacagta 1ka Shilin iyo 10ka senti waxaa dhexbartanka kaga masawiran wan idaha Soomaaliya ka mid ah, xagga sare ee ku aadka dhabarka wanka waxaa ku qoran qiimaha lacagta oo af Soomaali iyo Carabi ah, xagga dhinacyada bidix iyo midag ee masawirka waxaa ka raacsan taariikhda «1976» oo ku qoran af Soomaali iyo Carabi.

DHBARKA: Dhabarka lacagta 0.50ka iyo 0.05ta senti waxaa xagga sare ee ku aadan bartamaha ku yaal qiimaha lacagta oo ku qoran af Soomaal iyo Carabi. Dhinacyada bidix iyo midig waxaa ka raacsan taariikhda «1976» oo ku qoran af Soomaali iyo Carabi. Xagga hoose ee lacagta waxaa ku masawiran miraha beeraha Soomaaliya oo ay ka mid yihiin Galley, Sarreen, Moos Liimo iyo Cambe.

Qodobka 2aad

XEERKANI wuxuu dhaqangelayaa maalinta lagu soo qoro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

*Wasiirka Maaliyadda
Cabdiraxmaan Nuur Xirse*

JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE

Maxweynaha J.D.S.

DERCEE THE PRES. OF THE S.D.R. 23.8.76, Determination of the Artistical features of the new Somali Shilling coins L. (18)

DETERMINATION OF THE TECHNICAL AND ARTISTICAL FEATURES OF THE NEW SOMALI SHILLINGS COINS.

THE PRESIDENT OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

HAVING SEEN: The First Charter of the October 21st 1969 Revolution and the Law No. 1 of 21st October, 1969.

HAVING SEEN: Art. 5 of the Decree Law No. 2 of March 6th, 1961 converted into Law No. 13 of May 23rd 1961 on the Monetary Ordinance of Somalia.

HAVING SEEN: Decree No 17 of the President of the Somali Democratic Republic on the determination of the quantities of the new Somali Coins to be issued in Somali Shillings.

CONSIDERING The necessity to establish the technical and artistic features of 1.00, 0.50, 0.10 and 0.05 new Somali Shilling coins.

ON THE PROPOSAL of the Goversnor of the Central Bank of Somalia.

DECREES

Art. 1

The new 1.00, 0.50, 0.10 and 0.05 Somali Shilling Coins that the Central Bank of Somalia is authorized to issue according to Decree No of 23.8. 76 of the President of the Somali Democratic Republic shall have the following technical and artistic features:

A. TECHNICAL FEATURES

Denomination	Composition	Shape	Diameter MM.	Weight GRS	Edge
So. Sh. 1.00	Copro 75% Nickle 25%	Round	25.5	6.2	Milled
So. Sh. 0.50	Copro 75% Nickle 25%	Round	21.1	3.8	Milled
So. Sh. 0.10	Aluminium	12 Sided	22.5	1.4	Plain
So. Sh. 0.05	Aluminium	12 Sided	19.0	0.9	Plain

B. ARTISTICAL FEATURES

ON THE OBVERSE: of all coins there shall be reproduced in the centre the coat of arms of SOMALIA and around it there shall be inscribed the wording «SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC» both in Somali and Arabic languages, separated by two dots.

ON THE REVERSE: of the 1 Shilling and 0.10 cents there shall be reproduced in the centre the black headed sheep of Somalia and on top of it there shall be inscribed the value of the coin both in Somali and Arabic

On the left and right sides of the coins there shall appear the date «1976», both in Somali and Arabic.

ON THE REVERSE: The 0.05 cents there shall be inscribed on the top half the value of the coin both in Somali and Arabic and on the left and right side there shall appear the date «1976», both in Somali and Arabic.

At the bottom half of the coins there shall be reproduced the agricultural crops of Somalia, such as: Maize, Wheat bananas, Limon and Mango.

Art. 2

This Decree consito force on the date of its publication on the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Moqdisho 23.8.1976

The Minister of Finance

MAHAMED SIYAAD BARRE
THE PRESIDENT

Cabdiraxmaan Nuur Xirsi

OF THE SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S 29 Luuliyo 1976, Magacaabid Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaada Shaqaalaha L. (19)

M A D A X W E Y N A H A

J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaansha'a 1, 2 iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lamb. 17, 18 iyo 19 ee 1 Luuliyo 1976;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 9 ee soo baxay 15 Jannaayo 1975 oo ku saabsanaa Mideynta Guddiga Abaalmarinta iyo Guddiga Dallacaadda Shaqaalaha;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lamb. 1 ee soo baxay 1 Luuliyo 1976;

ISAGOO LA NOQOTAY: lagama maarmaan in la magacaabo Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaadda Shaqaalaha;

ISAGOO TIXGELINAAYA: talada u soo jeediyay Wasiirka Madaxtooyada ee Arrimaha Shaqaalaha

WUXUU XEERAYAA

Qod' 1aad

Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran waxaa loo magacaabay iney ka mdi noqdaan Guddiga Abaalmarinta iyo Dallacaadda Shaqaalaha;

- | | |
|---------------------------------------|------------|
| 1) Jaalle G. Sare Cabdi Warsama Isaaq | Guddoomiye |
| 2) Jaalle Yuusuf Xasan Aadan | Xubin |
| 3) Jaalle Axmed Cali Salax | Xubin |

Qod. 2

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa isla maalinta u saxiixo Jaalle Madaxweynaha, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmigaa ah ee Dawladga:-

Muqdisho 19.7.1976

Jaalle MOXAMED SIYAAD BARRE
Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S 29 Luulioy 1976, Dallacaad Saraakiil ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed L. (20)

M D A X W E Y N A H A
J.D.S.

ASAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2 ee 23.12.1972 kuna saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska;

ASAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyey Ciidanka Boliiska, kuna soo sheegay warqacdiisa lambar CIID/A/4 ee 28.7.1976

ASAGOO TIXGELIYEEY: Shaqadooda wanaagsan oo ay ku muujiyeen kacaannimo, daacadnimo iyo dadaal xad dhaaf ah;

ASAGOO DHEGEYSTAY: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha

WUXUU XEERAY

Qoç 1aad

In marka laga bilaabo 1da agoosto 1976ka, saraakiisha magacya-çoodu hoos ku qoran yihiin oo ka tiirsan Ciidanka Booliska la dallacsiyey lana gaarsiiyey darajada sarkaal walba hortiiisa ku qorn, taasoo ay ku muteysteen shaqadoodawanaagsan kuna muujiyeen kacaanimo, daacadnimo iyo dadaal xad dhaaf ah:

1. G.Dhexe Cabdinuur Yuusuf Axmed — G.Sare;
2. G.Dhexe Maxamuud Maxamed Magan — G.Sare;
3. G.Dhexe Jaama Xirsi Cumar — G.Sare;
4. G.le Cilmi Sahal Cali — G.Dhexe;
5. G.le Maxamed Gacal Maxamed — G.Dhexe;
6. G.le Saciid Bile Aadan — G.Dhexe;
7. Dhamme Xasan Garaad Cali — G.le.

Qodobka 2aad.

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu qori doonaa faafinta rasmiga ah eeDawladda.
Muqdisho, 29 Luulioy 1976.

Saxiix Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

MADAXWEYNAHA
J.D.S.

WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA
Xaxiix S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib

BOGGA SADDEXAAD

TALOOPYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA DEGMADDA/GOBOLKA

BERBERA

MARKUU ARAKY: Weydiinta Aadan Guuleed Cabdi.

MARKUU ARKAY: Caddaynta Bankiga Ganacsiga Ummadda, Berbera,

MARKAAN ARKAY: Qodobka 69 D.L. 9-9-65n. 2;

Waxa cad dhumista Buugga L. yahay 1825, kuna qoran tahay Sh. So. 1000/ = ee Bankiga Ganacsiga Ummadda. Waxaana amarayaa in loo cusbooneysiyo mar labaad buuggaas aan kor ku soo sheegay muddo 30 (sodan) beri oo ka bilaabta markii lagu dhigo faafinta Rasmiga ah haddaan la helin cid sheegta waana in gacanta laga saaro ninka magaciisu kor ku qoran yahay qof ka sita awood ama wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 30 beri. i

BERBERA. 9.8.1976

SHAWQI CILMI CALI

Gudoomiyaha Maxkamadda Degmadda Berbeera.

L. (2)

Maxkamadda Gobolka Benaadir

HADDUU: Arkay dacwada kor ku qoran,

MARKUU: Arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bankiga (eeg 000265), wuxuu ogaaday inay shaqadiisa tahay:-

HADDU Arkay qod. 69 D.L.9/9/65 N. 2; lumidda buuga keyda lam. 646 ku qoran Cumar Maxamed Nuur;

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboneysiyo buuga keyda oo ku qoran Jaalle Cumar Maxamed Nuur ka dibmarkiiy ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereta'a lagu soo shaaciyayo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In buuga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cumar Maxamed Nuur ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 14.8.76

GUDOOM. MAXK. BENAADIR

(Dr. Maxamed Muumin Maxamed)

L. (3)

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDU Arakay: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska bankiga.

HADDUU: Arkay qod. 69 D. L. 9.9.65 N. 2; lumi'ca buuga keyda lam. 5556 ku qoran Maxamuud Sheekh Axmed.

In loo cusboneysiyo buuga keyda oo ku qoran Jaalle Maxamuud Sheekh Axmed ka dib markii aan 30 maalmood ka soo wareegto maallinta dekertetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA:

In buuga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Maxamuud Sheekh Axmed ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah aiyadoo la sugaayo mudada 30 maalmood ah ee kor ku sheegnay.

Muqdisho 5.8.1976

GUDCOM. MAXK. GOBOL. BENAADIR

(Cabdullaahi Daahir Barre)

L. (4)

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA

MAXAMUUD CUSMAAN GUDAAL IYO

BANKIGA GNAACSIGA UMMADDA LAANTA HARGEYSA

AMAR LAMB. 487.76

Labada dhinac ee kor ku qorani waxay Maxkamadda keenen sida hoos ku qoran:-

Maxamuud Cusman Gudaal wuxuu Maxkamadda keenay arji uu ku codsanayo in Jeeg Wareegto ah kuna qoran Magaca Shirka'da (NATIONAL BOOTLING Co) Lam. yahay 094518 Taar. tahay 11.7.76.

Sidaas darteed markii aan eegay waxyaalaha kor ku qoran iyo markii aan arkay Qod .27 Xeerka Lamb. yahay 2 soona baxay 9.9.65 iyo qod. lamb.69 isla Xeerkaas.

WAXA LA AMRAYAA

1. In uu san socon jeegga Lamb. kan kor ku qoran laga bilaabo Maanta.

2. In lagu qoro Amarkaas Faafinta Rasmiga ah.

3. In lacagtaas ah Shs. 4.100/= Bankigu siiyo Maxamuud Cusman Gudaal 30 casho ka dib maraka lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Hargeysa, 4.9.76

L. (5)

*Xasan Xaaji Yuusuf
Guddoomiyaha Maxkamada
G. Hargeysa*

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE

KOLKAY ARAGTAY: Codsiga qoraalka ah uu keensaday Maxkamadda: Cali Faarax Cigaal kuna saabsan lumid buug keyd L/2383 ku qorneyd 7.000/= (todoba kun) Sh.

MARKII AY ARAGTAY: Warqad L/002775 ee 12.9.76 kana soo baxday Bangiga Ganacsiga Laanta Marka laguna sugay in buugga lambrkiisu kor ku xusn yahay ku jirto 7.000/ Sh. uu lahaa Cali Faarax Cigaal;

KOLKAY ARAGTAY: qod. 69 D.L. 2 taar. 9.9.1965:

WAXEY CADDEYSEY

Lumidda buuga L/2383 kuna qorneyd 7.000/= Sh. waxay amartay in la baabi'yo loona cusbooneysiyo Cali Faarax Cigaal buugaas 30 beri kaddib markii lagu qoro Faafinta Rasmiga ah; waana in gacanta laga saaro isaga ama qof wakaalo ka wata:-

Marka 18.9.1976

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADA

Cabdicaasiis Axmed Saalax

L. (6)

MAXKAMADA DEGMADA BERBERA

MARKAAN ARKAY: Weydiinta Ibrahim Cabdi Camale

MARKAAN ARKAY: Caddaynta Bankiga Ganacsiga Ummadda Berbere

MARKAAN ARKAY: Qodobka 69 D.L.1965 No. 2.

Waxaa cad dhumista Buugga Lam. yahay 1391/7, kuna qoran tahay Sh So. 1.001/ = ee Bankiga Ganacsiga Ummadda, Waxaa amraayaa in loo cusbooneysiyo mar labaad Buuggaas aan kor ku soo sheegay muddo 15 beri (shan iyo toban beri oo ka bilaabato markii lagu dhigo Faafinta Rasmiga ah haddaan la helin ciid sheegata waana in gacanta laga saaro ninka magaciisa kor ku qoran yahay ama qof ka sita wakaalad sharci ah iyadoo la sugaayo 15beri.

Berbera, 3.8.76

Shawqi Cilmi Cali

GUDDOOMIYAHA MAX. BERBERA

L. (7)

OGEYSIIS — ISMA — S.P.A.

Warshadda Marmarka iwm, ahna Shirkad Saamiley ah, saldhigeeduna yahay Muqdisho; waxay ogeysiineysaa dhamaan saamileyda shirkadda inta soo socota:

Qod. 1 Ayadoo dad saamileyda shirkadda ISMA ka mid ahu ay soo weydiisteen in laga iibsado saamiyaasha ay ku leeyihiin Shirkadda ISMA, sabab ayaga u gaar ah darteed, waxaa dhamaan saamileyda loo bandhigaa xigiinta iibka saamiyaashaas.

Qod. 2 Saamileyda dooneysa in ay iibsato saamiyaashaas, waxaa muddo la siiyey 15 maalmood ka billaabata bishaan Seteember 15da, 1976 kuna dhamaata 30da bishaan, 1976; Muddadaas chexdedana ay ku soo wargeliyaan Guddiga Maamulka Shirkadda.

Qod. 3 Haddii ilaa intaas aan cidna soo weydiisan iibkaas, waxay u fasaxan yihiin in ay ka iibsan karaan cid kale oo dooneysa.

Qod. 4 Sidaas oo kale waxaa loo bandhigayaa saamileyda, saamiyaashii lagu kordhiyey hantida Shirkadda ISMA — S.P.A. bishii Luuliyo 7dii, 1976 muddo aan ka badneyn lixbilood laga billaabo taariiqda Bandhigaan.

GUDDIGA MAAMULKA

Muqdisho, 15.9.1976.

L. (8)

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9-9-65 L. 2; iyo lumidda Jeegga lam. 095009 oy ku qoran tahay Sh. So. 2.400.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbneysiiyo Jeegga Wareega ka cib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo Faafinta Ras-miga ah ee Dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeeggaas cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Jaalle Cawil Xasan Dirir ama qof isla isaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 15ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 11 Setember 1976.

GUDDOOM. MAXK. G. BENAADIR

(Cabdullaahi Daahir Barre)

L. (9)